



Qoysas Caafimaad qaba

Ciladaha

Waxaan u baahan nahay inaan yarayno caqabadaha haysa qoysaska. Taageerida dadka reer Oregon nolosha oo dhan ayaa muhiim u ah qoysas caafimaad Qaba. Laga bilaabo daryeelka hooyada iyo dhallaanka oo ku haboon dhaqanka ilaa barnaamijyada daryeelka ilmaha, ilaa adeegyada kahortaga cudurka ee carruurta iyo waayeelka, ilaa ka caawinta dadka waawayn helitaanka adeegyada Medicare. Taageerooyinka saxda ah ee bulshada ayaa muhiim u ah qoysasku inay kobac sameeyaan.

Inkastoo Oregon uu dejiyay qaab wanaagsan oo lagu bixinaayo daryeelka caafimaadka, dad badan oo degan gobalka ayaa wali waajahaaya caqabado ka haysta heitaanka adeegyada kahortaga cudurka. HTO waxay doonaysaa inay kor u qaado maadaama daryeelka caafimaadka ee kahortaga cudurku yahay aalad awood badan u leh yaraynta khatarta cudurka, naafada iyo cudurka iyo sidoo kale yaraynta caqabadaha dhanka caafimaadka ee qaar aad u badan oo bulshooyinkeena kamid ah ay waajahayaan.

Xalalka

Istaraatiijiyadaha looga taageeraayo qoysaska daryeelka, korinta iyo helitaanka adeegyada kahortaga cudurka ayna ku jiraan:

- Xaqiijinta helitaanka iyo khayraadka daryeelka carruurta iyo korinta oo qiimo jaban, tayo sare leh, kuna haboon dhaqanka iyo luuqada

- In lagu dhiso hal adkaysiga qoyska tababarada iyo caawimaadaha kale
- In la xaqiijiyo helitaanka daryeelka hooyada iyo dhallaanka oo ku haboon dhaqanka oo la siiyo dadka danyarta ah iyo dadka aan sharciga haysan

Hanaanka Healthier Together Oregon (HTO) wuxuu u taagan yahay taageerida shaqsiyaadka heer kasta oo ay nolosha ka joogaan. Daryeelida baahiyaha waalidiinta iyo qoysaska kahor iyo kadib dhalimada ilmaha ayaa xaqiijinaysa natiijooyinka ugu fiican ee macquulka ah oo ay heli karaan qoyska oo dhan. Helitaanka barnaamijyada tayada sare leh, ee ku haboon dhaqanka ee booqashada guriga iyo daryeelka ilmaha ayaa gacan ka gaysanaaya u faa'iidaynta ubadka inta lagu jiro waqtiga muhiimka ah ee noloshooda.

HTO waxay taageeraysaa xeelado lagu xalinaayo baahiyaha dhaqan-dhaqaale iyo kuwa xoriyada caafimaadka ayadoo la adeegsanaayo tababaro ku haboon dhaqanka lana siinaayo helitaanka taageerooyinka muhiimka ah ee bulshada qoysaska.

HTO waxay raadinaysaa qaabab ay ku balaarinayso adeegyada si loo xaqiijiyo in qoysasku helaan taageerada iyo tasmada ay u baahan yihiin, markay u baahan yihiin.

Taageerooyinkaan waxay kordhiyaan suurtagalnimada in qoysku ay u adkaysan karaan ayna kasoo kaban karaan caqabadaha nolosha ayna ku xoojin karaan hal adaygooda.



HTO: Qorshaha Dhisida Oregon intaan Ka fiican

Healthier Together Oregon (HTO) waa farsamo awood badan oo lagu hormarinaayo sinaanta dhammaan dadka Oregon. Ayadoo COVID-19 uu wax badan kala cadeeyay, maaha in qof kasta helay fursad iskumid ah oo uu ku noolaado nolol caafimaad leh. Dadka aan cadaanka ahayn, dadka danyarta ah, dadka ktirsan bulshada LGBTQ+ (qaniisiinta), dadka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha, dadka naafada ah iyo dadka ku nool deegaannada miyiga ah ee gobalka ayaa waajahaaya caqabado badan sabab la xariirta cadaalad daro ka jirta qaab dhismeedka bulsho iyo midka dhisme taasoo saamayn ku leh caafimaadka.

Sababa la xariirta in caafimaadka iyo fayaqabku ku tiirsan yihiin arimo kaladuwan, HTO ayaa dejisay taxaneyaalka badan oo xeelado ah kuwaasoo, marka la xaliyo si guudna loo dhaqan gasho, hormarin muuqat ku samayn kara noloshu qof kasta oo gobalkaan dagan.

HTO waxay doonaysaa inay dejiso Qorsheyaasha Hormarinta Caafimaadka Bulshada iyo sidoo kale muhiimadaha wakaaladaha iyo ururada, barnaamijyada iyo maalgashiyada. Waxay doonaysaa iskaashato kaladuwan oo ka shaqeeya

laamaha kaladuwan oo wadaagaaya dedaal lagu dhaqan gelinaayo yoolalkaan waawayn. Waaxahaan waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka, saraakiisha la doortay, loo shaqeeyaasha, tabarucaada, gaadiidka, isticmaalka dhulka iyo qorshaynta, caafimaadka gobalka, qabiilka iyo kan dadwaynaha ee maxaliga ah, cadaalada danbiyada iyo fulinta sharciga, ururada bulshada, ururada ku salaysan diinta, adeeg bixiyaasha guriyaynta iyo aadanaha iyo waxbarashada.



Nala samee Iskaashi

HTO waxay doonaysaa inay xariir la samayso qolyaha kale ee u taagan inay hormariyaan sinaanta ka jirta Oregon. Si aad u hesho xog dheeraad ah ama nagalaso xariir:



WEBSSETKA

healthiertogetheroregon.org



IIMEELKA

publichealth.policy@state.or.us



NOQO ISKAASHADE

healthiertogetheroregon.org/potential-partner



YOUTUBE

bit.ly/3jvkuAE



Healthier Together Oregon

healthiertogetheroregon.org

Waa mashruuc ay fulinayso
Oregon Health Authority
(Maamulka Caafimaadka ee Oregon)